
# Warbixinta Kooxda Jawaab Celinta Degdega ah ee Kala Kaxaynta Qoyska — JULAAY 2025 WARBIXINTA GUDAHA




Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## TUSMADA XOGTA


Hordhac . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1

Ka qayb galayaasha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1

Kulamada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 1

Hawlaha Wakhtigan . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 2

Aagaga Dheeraadka ah ee la Eegayo . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

Saadaasha Mustaqbalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

Sida Loola Socdo . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

Xidhitaanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

Lifaaq . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 5

Naqdinta Lix Bilood ee Kooxda Jawaabta Degdega ee Kala Kaxaynta Qoyska . . . . . . . . . . . . . . . . . . 5

# HORDHAC

Janaayo 27, 2025, Bob Ferguson waxa uu saxeexay Wareegto 25-04 **(https://governor.wa.gov/sites/default/files/exe_order/EO%2025-04.pdf)** taas oo lagu sameeyay Kooxda Jawaabta Degdega ah ee Kala Kaxaynta Qoyska (Kooxda Jawaabta Degdega ah), oo ay hogaaminayso Washington State Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Gobolka Washington ee Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF). Ujeedada guud ee Kooxda Jawaab Celinta Degdega ahi waxaa weeye inay sameeyaan talooyin hormarin siyaasadeed oo sida gobolka Washington uu u hormarin karo jawaabta waxyeelada, jahwareerka, iyo saamaynta kale ee mudada dheer ah ee caruurtu ay kala kulmayaan kala kaxaynta qoyska ee marka la mastaafuriyo ama la xidho waalidkooda ama daryeelayaashooda kowaad.

Warbixinta kumeel gaadhka ah ee kowaad (ADM_0033) waxaa laga heli doonaa websaytka **https://dcyf.wa.gov/publications-library/ADM_0033** oo waxay ka hadlaysaa sadex bilood ee kowaad ee hormarka Kooxda Jawaabta Degdega ah, laga bilaabo Janaayo ilaa Abriil 2025. Warbixintan waxay ka hadlaysaa sadexda bilood ee labaad ee u dhaxeeya Maay ilaa Julaay 2025.

# KA QAYB GALAYAASHA

Kooxda Jawaabta Degdega ahi waxay ka kooban hay'ado gobol oo arrimahan ku ah khabiiro. Waxa aanu kala shaqaynaa hay'adaha bulsha iyo wakiilada sharciga si aanu uga warbixino shaqadeena.

Si aanu uga taageero cidan aanu leenahay iskaashiga, waxa aanu bilawnay Gudi La Shaqayn Bulshada oo cusub. Gudidu waxay ka kooban tahay wakiilo ka socda hay'adaha bulshada ku salaysan ee soo socda:

- Northwest Immigrant Rights Project (Mashruuca Xuquuqda Soo Geleytiga Waqooyigalbeed, NWIRP)
- WA Dalada Qareenada Dadka Soo Geleytiga
- OneAmerica
- Kids in Need of Defense (Caruurta Difaaca U Baahan, KIND)
- Legal Counsel for Youth and Children (Looyarta Dhalinyarta iyo Caruurta, LCYC)
- Adeega Qoyska Yuhuuda
- Adeega Bulshada Kaatooliga
- Latalinta iyo Adeegyada Gudbinta Aasiyaanka

Waxaa sharaf noo ah in aan helno wakhtiga iyo wada shaqaynta hogaamiinta dadaalka badan ee hay'adahan. Waxaa jira hay'ado badan oo u adeega dadka soo geleytiga gobolka oo dhan, oo kula shaqeeya koox yar hay'adahan taas oo noo sahasha in aanu yeelano kooxda shaqaysa.

# KULAMADA

Kulamadan sadexda biloodba ah, waxaa la qabtay afar kulmo Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah, oo qiyaastii waxaa ka qayb galay 30 ruux kulankiiba oo matalaya hay'adaha iyo gudiyada, xeer dejiyayaasha iyo saraakiil kale oo la doortay oo gobolka ah iyo bulshada lala sahqeeyo ee gobolka oo dhan. Sidoo kale, dhawr gudi sida loogu baahdo ah ayaa yeesha kulan joogto ah oo lagaga wada hadlayo hormarinta siyaasada. Wixii ka danbeeya, qaybta muhiimka ah ayaa kulmi doonta bil kasta oo gudiyada kale waxay u kulmi doonaan sida loogu baahdo si loo taageero shaqadan siyaasada diirada la saarayo.

Waxaa soo socda guudmarka heerka sare ee kulamada Kooxda Jawaabta Degdega ee la qabtay sadexdii bilood ee labaad ee 2025.

## MAAY 6, 2025

- Xafiiska Badhasaabka ayaa soo bandhigay guudmarka qaybaha ay khusayso ee miisaaniyada dhawaan la ansixiyay, oo waxaa daba socday wada hadal furan oo ku saabsan saamaynta ay yeelan karaan Kooxda Jawaabta Degdegu iyo barnaamijyada la xidhiidhaayi.
- Waaxda Liisamada ayaa soo bandhigtay noocyada aqoonsiga ee waafaqsan sharciga Aqoonsiga DHABTA AH (REAL ID), iyo caqabadaha dadka aan deganaanshaha haysan ee aan u qalmin inay ku isticmaalaan liisanka gaadhiga madaarka. Employment Authorization Documents (Waraaqaha Ogolaanshaha Shaqada, EAD) iyo baasboorada ajaanibka ah ayaa u hogaansamaya, laakiin waxaa jira shaqo badan oo la wado oo taaban arjiyada EAD.
- Wada hadal wanaagsan ayaa la qabtay oo ku saabsan siyaasadaha madaarka. Kooxda Jawaabta Degdega ah ayaa ka dalbatay bayaamin dheeraad ah Maamulaha Ku Xigeenka Siyaasadaha Federalka Xafiiska Badhasaabka inuu u sheego meelaha gobolku ka maamulo madaarka iyo meelaha federalku maamulo, iyo sida qoysasku ay u heli karaan taageero sharci inta ay joogaan madaarka.

## MAAY 27, 2025

- OneAmerica waxay soo bandhitay Kooxda Jawaabta Degdega ah, waxay sheegeen sida ula shaqeeyaan bulshooyinka-oo kaligood uu maaha. Waxay leeyihiin xidhiidh bulsho oo qoto dheer oo waxay awood siiyaan hogaamiyayaasha deegaanka si ay u siiyaan tobobarka Baro Xuquuqdaada oo waxay la wadaagaan muhiimiyada dhamaystirka Qorshayaasha Amaanka Qoyska. Faahfaahinta talooyinku waxay ku yaalaan qoraalka kulanka ee websaytkeena.
- Wakiilada Gudida iyo Hay'ada anshaxa ayaa yeeshay kulan albaabadu u xidhan yahay si ay uga wada hadlaan talooyinka Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah.

### JUUN 17, 2025

- Isbedelo badan oo aaga soo geleytiga ayaa laga wada hadlay oo waxaa barbar socday saamayntooda, oo waxaa kamid ahaa meesha ka saaritaanka eegitaanka tooska ah ee talaabo kale ee shakhsiyaadka leh xaalada Special Immigrant Juvenile (Deganaanshaha Gaarka ah ee Ilmaha Aan Qaan Gaadhin, SIJ).
- Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waxay ka wada hadleen warbixinaha ku xeeran adeegyada Medicare & Medicaid ee lagula wadaagay xogta macmiilka ee Medicaid ee ay ka heshey Washington State Health Care Authority (Maamulka Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington, HCA) Waaxda Arrimaha Gudaha.
- Cida Bulshada Lagala Shaqeeyo ayaa ka hadashay oo u bayaamisay talooyinkooda, dhismaha bandhiga hore ee kooxda.
- Hay'adaha ayaa ka hadlay Bushqadaha Go'aanka ee mustaqbalka. Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah ayaa ka hadlay uruurinta talooyinka, cusboonaysiinta Bushqada Go'aanka, iyo waxyaabah kale ee la xidhiidha laanta socdaal oo waxay dalbadeen in laga dhigo waraaqaha "Shayada Lala Soconayo" ee madashada xeer dejinta 2026.


### JULAAY 8, 2025

- Maamulaha Kooxda Jawaabta Degdega ah waxa uu bixiyay soo koobitaan kulanka Bulshada ee Dhawaan, oo waxaa lagaga wada hadlay waxyaabaha lagu bixiyay ee soo socda ee tilmaamaha iyo talooyinka la keeney. Baahida loo qabo adeegyada caafimaadka maskaxda ee caruurta qoyskooda laga kaxeeyay iyo bixiyayaasha adeegyada soo geleytiga ayaa diirada lagu saaray.
- Waxaa la sheege inay jirto siyaasad cusub oo federal ah, U.S. Immigration and Customs Enforcement (Ciidanka Laanta Socdaalka iyo Kastamyada, ICE) Xeerka 11064.4 (lasoo saaray Julaay 2, 2025), *Xadhiga iyo Mastaafurinta Waalidka iyo Masuulka Sharciga ah ee Bilaa Sharciga ah ee Caruurta Yaryar*. Tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan saamayn uu yeelan karo ayay dalbadeen dad badan oo ku jiray kulanku.
- Ku daritaanka HR1 $300 ee milyan ee loo kordhiyay Xafiiska Dib u Dejinta Qaxootiga federalka, oo waxaa kamid ah u helitaanka cid kafaale qaada caruurta bilaa cida ah, ayaa laga hadlay.
- Talooyinka warbixintan ayaa laga wad hadlay.
- Waxa aanu eegay oo aanu ka wada hadlaynay Jaantuska A: Naqdinta Lix Bilood ee Kooxda Jawaabta Degdega ee Kala Kaxaynta Qoyska Waxa aanu eegnay dhinaca Wareegta 25-04 ee la dhamaystiray, hawlaha dhici doona lixda bilood ee soo socda. Naqdinta mashruucan waxaa la samayn doonaa bilawga Agoosto oo waxa uu yeelan doonaa qorshaha mashruuxa lix bilood ee dhamaan siyaasadaha weli aan dib u eegitaanka lagu samaynin.

## HAWLAHA WAKHTIGAN

Kulamada banaanka, Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waxay wadaa abuurista khayraadka, ku shaqaynta koox yar, iyo la shaqaynta cida bulshada lagala shaqeeyo. Hoos waxaa ku yaala dhawr tusaale oo hawlaha dhawaan ah oo laga heley sadexda bilood ee labaad.

- Dib u eegitaanka baahiyaha tixraaca laanta socdaalka ee baahiyaha dhalinyarta gobolku gacanta ku hayo oo ay is kaashanayaan khabiirada sharciga laanta socdaalka, cida bulshada la iska kaashanayo, Xafiiska Kaalmada Sharciga Madaniga, iyo Xafiiska Difaaca Shacabka. Naqdintan waxaa lagu samayn doonaa dib u eegitaan joogto ah in la raacay nidaamyada wanaagsan ee nidaamka gudbinta, gaar ahaan marka la eego xaalada siyaasada federalka ee isbedelaysa
- Dib u eegitaanka dhamaan siyaasadaha la xidhiidha laanta socdaalka ee DCYF oo la iska kaashanayo AGO si loogu hogaansamayo Sii Shaqaynta Washington.
- Samaynta shax si siwanaagsan loogu bixiyo sida caruurtu gacanta ugu geli karto DCYF hadii waalidka ama koriyaha ay xidhaan ama ay mastaafuriyaan ciidanka laanta socdaalku.



- Samaynta dib u eegitaanka lixda bilood ee Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah iyo si loo xaqiijiyo u hogaansanka amarada Wareegta 25-04. Eeg *Jaantuska: Naqdinta Lix Bilood ee Kooxda Jawaabta Degdega ee Kala Kaxaynta Qoyska (boga 5).*
- Wakiilada dhawr gudi iyo dhinacyo iskaashi oo gobolka oo dhan ah, sida Gudida Arrimaha Hisbaaniga iyo Interagency Coordinating Council (Golaha Isku Keena Hay'adaha) Gobolka ee DCYF. Ka wada hadalka kooxda gobolada kale ayaa keeney in jawaabo toos ah laga helo samaynta mudnaanaha iyo bixnta ee Kooxda Jawaabta Degdega ah si ay u eegto.
- Samaynta nidaam qabyo qoraal ah oo Kooxda Jawaabta Degdega ah si loo fududeeyo waxa hadalka wax ku oolka ah ee ganacsiyada, dugsiyada, cida lala shaqeeyo, ciidanka deegaanka, iyo bulshada cida kale ee lagala shaqeeyo ee uu saameeyay marka uu dhaco hawlgal wayni.
- Kormeerka iyo ka wada hadalka siyaasadaha federalka ee is bedelaha, caqabadaha hormarinta adeegyada ee qoysaska leh xaaladaha deganaanshaha kala duwan, iyo caqabadaha sharci ee dhalinyarta aan haysan dhalashada.
- Kormeerka isbedelada siyaasada federalka ee saamaysa nidaamka shaqo ee sharci ee laanta socdaalka ee caruurta. Ilaa maanta, waxaa kamid ah:
  - Isbedelada masuuliyada xuquuqda waalidka (Julaay 14, 2025)
  - Cusboonaysiinta Xaalada FIISAHA Gaarka ah ee Caruurta Soo Geleytiga ah (Julaay 15, 2025)
  - Isbedelada Adeegyada Caafimaadka & Bilaa Aadanka US ee tilmaamaha bixinta adeega
    *Cida bulshada aanu kala shaqayno (NWIRP, KIND, OneAmerica, WAISN, iyo LCYC) ayaa qayb muhiim ah ka ah si ay noogu sheegto shaqadan iyo si ay nooga taageerto jawaabteena siyaasada. Waxa aanu uga mahad celinaynaa hogaamintooda joogtada ah.*
  - Samaynta waraaqaha xogta ee ka caawinaysa qoysaska inay u diyaar garoobaan marka hore kala kaxayn ka iman karta xadhiga la xidhiidha laanta socdaalka ama mastaafurinta. Waraaqahan, oo ay ku jiraan macluumaadka iyo linkiyo waxaa weeye xog waxtar leh, oo waxaa lagaga heli doonaa dhawr luuqadeed websaytkeena, oo waxaa lala wadaagi doonaa cida bulshada aanu kala shaqayno si loo xaqiijiyo inay helaan shacabku.

*Linkiyada soo socda ee macluumaadka ayaa ku jira waraaqaha:*

- Kaalmada Sharci ee Qorshaha Amaanka Laanta Socdaalka ee Dhalinyarta iyo Caruurta **https://lcycwa.org/isp**
- Midhaha Xogta Dalada ee Qorshaynta Hantida iyo Shaqada **https://appleseednetwork.org/planningmanual**
- Xogta Ugu Danbaysa ee Waraaqa Aqoonsiga Dhabta ah **https://realidwa.com**
- Xarunta Jawaab Celinta Degdega ah ee Gudida Arrimaha Hisbaaniga ee Gobolka WA **www.cha.wa.gov/rapid-response-hub**
- Helitaanka Khayraadka Dalada Qareenada Soo Geleytiga Washington **https://resources.waisn.org**
- Office of refugee and immigrant Assistance (Xafiiska Kaalmada Qaxootiga iyo Laanta Socdaalka) **https://app.smartsheet.com/b/publish?EQBCT=8e7e2fd0641f4f1e90bbaa36a0bc232d**
- Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Shacabka (Xafiiska Maamulaha Waxbarashada Shacabka) ee tilmaamaha qoysaska soo geleytiga ah **https://ospi.k12.wa.us/policy-funding/equity-and-civil-rights/immigrant-students-rights-attend-public-schools**
- Mashruuca Xuquuqda Soo Geleytiga NW iyo Macluumaadka Xuquuqdaada Baro ee ACLU **www.nwirp.org/resources/kyr**
- Khayraadka taageerada sharciga
- Guudmarka Sii Shaqaynta Washington **https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=43.17.425**

# AAGAGA DHEERAADKA AH EE LA EEGAYO

Kooxda Jawaabta Degdega ah waxay kala shaqeeyeen gal daloolada siyaasada aqoonsiga ee hay'adaha gobolka ee uu saameeyay. Waxa aanu ogaanay caqabadaha soo socda oo ka baxsan aaga ama ogolaanshaha Kooxda Jawaab Celinta Degdega ah.

1. **Sirta iyo ilaalinta xogta macluumaadka aqoonsiga shakhsi ahaaneed.** Hay'adaha gobolka Washington ee helaya, haya oo maamulaha gelitaanka qabo badan oo kamid ah xogta shakhsi ahaaneed oo ku saabsan dadka degan Washington, oo ay ku jiraan qoysaska soo geleytiga ahi. Bixinta sharciga ah ee macluumaadkan ayaa badanaa loogu baahdaa in loogu adeego caruurta iyo qoysaska la shaqaynaya hay'adaha gobolada badan iyo hay'ado samofal oo badan; laakiin in macluumaadkan kaliya ay heli karaan dadka loo ogol yahay inay si sharci ah u helaan oo leh ujeedo xadidan ayaa daruuri ah.
2. **Walaacyada ku saabsan deeqda gobolka iyo federalka iyo shuruudaha heshiiska.** Gobolka ayaa hela deeqda federalka oo leh shuruudo iyo shuruuc badanaa ka hor imanaya waajibaadka sharci ee gobolka. Washington State Attorney General's Office (Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Gobolka Washington, AGO) ayaa eega masuuliyada sharci iyo khataraha.

   Hay'adaha ayaa suga fasaxa, tilmaamo joogto ah iyo tobobar lagu eegayo, lagu cabirayo saamaynta, oo lagu yaraynayo saamaynta xun ee waajibaadyadan iska hor imanaya, iyo sidoo kale jihada bixiyayaasha adeega heshiiska lagula jiro.

# SAADAASHA MUSTAQBALKA

Dhawrka bilood ee soo socda, waxa aanu eegno doonaa siyaasadaha soo socda, anaka oo iska kaashanayna cida aanu bulshada kala shaqayno, oo meesha ka saaraysa caqabadaha ku jira Wareegtada, oo ay kamid yihiin laakiin kuma xadidna:

- Kala shaqaynta K-12 iyo cida aanu kala shaqayno waxbarashada sare siyaasadaha saamayn kara qoysaska iyo ardayda ay qoyskoodu leeyihiin xaaladaha kala duwan.
- Isku keenista iyo qaybinta khayraadka loogu talo geley inay ugu diyaar garoobaan qoysasku kala kaxaynta, iyo sidoo kale dadka ay marka hore saameeyeen kala kaxaynta la xidhiidha laanta socdaalku.
- Siinta xogta ugu danbaysa iyo talooyin Xafiiska Badhasaabka iyada oo loo marinayo warbixinta gudaha ee Oktoobar 2025 iyo warbixinta ugu danbaysa ee Janaayo 2026.
- Samaynta tilmaamaha Siyaasada Wixii Ka Baxsan Dugsiga oo lagaga hadlayo sida hantida ka baxsan dugsiga ee Sii Shaqaynta Washington u shaqayso.
- Dadaal midaysan oo hay'adaha gobolka oo dhan ah iyo ururada samofalka si looga jawaabayo baahiyaha aas aasiga ah ee qoysaska kadib marka ay timaado kala taga laanta socdaalka, waxaa kamid ah dariiqooyin lagu taageerayo masuuliyihiin walaalaha.
- Turjubaada socota iyo la wadaagista isbedelada siyaasada soo geleytiga ee federalka cida lagala shaqeeyo gobolka iyo deegaanka.

Wixii faahfaahin dheerad ah, ka eeg Jaantuska: Naqdinta Lix Bilood ee Kooxda Jawaabta Degdega ee Kala Kaxaynta Qoyska ee boga 5.

# XIDHITAANKA

Isbedelo wayn oo siyaasada federalka ee sadexdan bilood ah ayay u baahdeen kooxdan si shaqadeenu u fududaato. Waxaanu si wayn ugu mahadnaqaynaa xubnaha Kooxdeena Jawaabta Degdega ah iyo cida aanu bulshada kala shaqayno ee cadeeyay marar badan inay ka go'an tahay shaqaynta wakhtigan adagi. Waxa aan filanayaa - oo inkasta oo ay jiraan - caqabo mustaqbalka ah, waxa aanu sii wadi doonaa in aanu baadhno qaabab aanu ku hormarinayno siyaasadaha saamaynaya qoysaska aanu u adeegno. Waxa aanu sii wadi doonaa in aanu doon doono qaabab aanu ku taageereyno oo aanu ku ilaalinayno qoysaska soo geleytiga ah ee gobolka Washington.

## Sida Loola Socdo

Cida iskaashiga lagala leeyahay bulshada, hay'adaha bulshada, iyo qoysaska waxaa lagu dhiiri geliyaa inay iska duwaan geliyaan **dcyf.wa.gov/FamilySeparationRapidResponseTeam** si loo helo iimeelka xogta ee shaqada Kooxda Jawaabta Degdega ah. Xogta waxaa wakhtigan lagu bixiyaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Somali.



# LIFAAQ

## Naqdinta Lix Bilood ee Kooxda Jawaabta Degdega ee Kala Kaxaynta Qoyska

Waxaa soo socda waa shaxda hormarkeena lixda bilood ee kowaad ee naqdinta dhamaystirka siyaasada hawlaha ee ay dejisay Wareegtada Badhasaab Ferguson ee 25-04 **(https://governor.wa.gov/sites/default/files/exe_order/EO%2025-04.pdf)**. Waxaa kamid ah dib u eegitaankeena lixda bilood iyo ka jawaabitaanka wada hadalka iskaashiga ee cida bulshada la iska kaashanayo, Kooxda Jawaabta Degdega ah waxay aqoonsadeen baahida sidookale lagu darayo shaqada ku xeeran taageerada bulshada, taas oo lagu soo koobay madashii ugu danbaysay.

Dhanka bidix waxaa ku yaala liiska hagayaasha oo kala horeeya (far madaw), oo dhanka midigna waxaa ku yaala sharaxa lasoo koobay ee hawlaha gaadhay yoolashan.

**FURAHA:** ● La Dhameeyay (buluug) ● Socda (cagaar) ● Aan Bilaabmin (guduud)

| Wareegto | Shaqooyinka |
|---|---|
| **Akhrinta siyaasadaha hay'ada** iyo nidaamyada lagu garanayo wixii isbedelo lagu taliyay ee nidaamka ee gacan ka gaysan kara ka jawaabitaanka gaar ah ee kala kaxaynta lama filaanka ah ee qoyska, waxaa kamid ah xaaladaha caruur badan oo isku meelo kasoo jeeda ay ula kulmi karaan kala kaxaynta qoyska isku wakhti; | (La Dhameeyay) Bandhigyada siyaasadaha la xidhiidha ee laga heley hay'adaha lala shaqeeyo<br>(La Dhameeyay) U gudbinta talooyinka siyaasadaha ilaalinta xogta ee la xidhiidha xaalada soo geleytiga ee hay'ada oo dhan<br>(Socda) La Akhrinta Sii Shaqaynta Washington Qaybta Xuquuqda Madaniga ah ee AGO<br>(Aan Bilaabmin) Samaynta siyaasadhaa lagu taageero shaqaalaha gobolka ee aan dhalashada haysan<br>(Aan Bilaabmin) Samaynta siyaasadaha lagu xoojinayo ee lagu heleyo Sii Shaqaynta Washington iyo Maxkamad Cidwalba U Furan<br>(Aan Bilaabmin) Xaqiijinta helitaanka taageerooyinka luuqada ee dhamaan adeegyada hay'ada gobolka |
| **Kala tashiga qoyska iyo khabiirada badqabka qoyska ka wada hadalka siyaasadaha** mustaqbalka ama nidaamyada u gaar ah caruurta waadlidka ama cida ka masuulka ah la mastaafuriyay ama la xidhay, iyada oo diirada lagu saarayo ka caawinta ilmaha xaalada gaarka ah iyo yaraynta waxyeelada rasmiga ah ee ay ku keeni karto kala kaxaynta qoyska soo geleytiga ah. | (La Dhameeyay) Bandhiga iyo wada shaqaynta joogtada ah ee hay'adaha laanta socdaalka iyo khabiirada caydha ilmaha ee DCYF<br>(La Dhameeyay) Talooyinka sharci ee hay'adaha soo geleytiga<br>(Aan Bilaabmin) Samaynta nidaamka wanaagsan ee samofalka ilmaha ee ku xeeran jahwareerka kadib kala kaxaynta<br>(Aan Bilaabmin) Isku keenista khayraadka caafimaadka maskaxda ee qoysaska iyo bixiyayaasha uu saameeyay |
| La kulanka wakiilada Xafiiska Maamulka Tilmaamaha Shacabka Office of Superintendent of Public Instruction, (Xafiiska Maamulaha Waxbarashada Shacabka. OSPI) iyo degmo dugsiyeedka deegaanka si **loo sameeyo khidado** lagu yaraynayo khalkhalka waxbarshada iyo hormarka caruurta waalidkooda ama cida ka masuulka ahayn la mastaafuriyay ama la xidhay; **Abuurista wanaagsan oo ay ku xidhiidhayaan DCYF, OSPI, iyo degmo dugsiyada deegaanku.** | (La Dhameeyay) Qaybinta iyo uruurinta tilmaamaha hore ee ku jira websaytkeena<br>(La Dhameeyay) Bandhigyada laga heley OSPI in la gaadhsiiyo kooxdeena<br>(Socda) U qaybinta waraaqaha xogta dugsiyada<br>(Socda) Samaynta siyaasada Wixii Ka Baxsan Dugsiga<br>(Aan Bilaabmin) La xidhiidhida, iyo iskaashiga degmo dugsiyeedyada<br>(Aan Bilaabmin) Diyaarinta tilmaamaha dugsiyada iyada oo la iska kaashanayo OSPI. |

Abuurista khad hore oo xidhiidh uu u dhaxeeya DCYF, OSPI, iyo degmo dugsiyeedyada deegaanka si ay u **suurto gasho ficilada degdega ah iyo ka jawaabida** hadii, tusaale ahaan, waalidka ama masuulka ilmaha loo qaado mastaafurid ama la xidho iyada oo ilmuhu uu dugsiga joogo, ama xaalado kale ay jiraan waxay hay'ada saaraysaa masuuliyad wax ka qabadka iyo la shaqaynta taageerada ilmaha.

- Abuurista nidaamka xogta wacyi gelinta hay'ada gobolka

Kala shaqaynta jaamacadaha, kuuliyadaha, kuuliyadaha bulshada, iyo Running Start sidii loo **sugi lahaa oo loo taageero lahaa jid wax ku ool ah oo** waxbarashada sare ah ee caruurta la kulantay jahwareerka waalidkooda ama cida ka masuulka ah ee laga mastaafuriyay ama laga xidhay;

- Isku duwitaanka bandhigyada laa heley bandhigyada waxbarashada sare
- Samaynta taageero loogu talo geley walaalada waawayn ee noqday masuuliyiinta
- Akhrinta isbedelada ilaa shuruucda federalka ee HR 1

Siinta **xogta ugu danbaysa ee joogtada ah** Xafiiska Badhasaabka ee ku saabsan hawlaha Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah iyo siyaasadaha lagu taliyay; saamaynta mastaafurinta ee shaqada DCYF; iyo wixii kale ee qorshahe ah ee cid dheeraad ah oo gacan saar la leeyahay ama iskaashiga hay'adaha dhaxdooda oo ka caawin kara caruurta la kulanta kala kaxaynta qoyska ee mastaafurinta ama xadhiga waalidka ama daryeelayaasha.


- Siyaasada Xafiiska Badhasaabka ee ka qayb galka khabiirada Kooxda Jawaabta Degdega ah iyo Gudida Go'aamisa
- Iskaashiga Xafiiska Badhasaabka ee Bushqada Go'aanka ee iman karta
- Abuurista nidaamka isgaadhsiinta ee ansixinta u dhaxaysa xafiisyada

**Siinta warbixinta kowaad** Xafiiska Badhasaabka ugu danbayn Abriil 30, 2025, iyada oo kadibna sadex bilood oo kasta la siinayo ama iyada oo qaab kale ah mudada lagu heshiiyo Xafiiska Badhasaabka. Kooxda Ka Jawaabida Degdega ah waa inay ka shaqayso sidii loo xaqiijin lahaa in warbixinteeda lagu gudbiyo si ay u heli karaan xubnaha shacabka iyad aoo luuqado badan ku qoran.

- Warbixinta la gaadhsiiyay Xafiiska Badhasaabka waxay ku jirtaa websaytkeena Ingiriisi, Kuuriyaan, Soomaali, Isbaanish, Yukrayni, iyo Fiitnaami iyada oo ah, iyo sidoo kale macluumaadka one-pager ee macluumaadka ku saabsan Kooxda Ka Jawaabitaanka Degdega ah
- Gubinta Warbixinta Kumeel Gaadhka ah ee Julaay
- Gubinta Warbixinta Kumeel Gaadhka ah ee Oktoobar
- Gubinta Warbixinta Kama Danbaysta ah ee Janaayo

**Bixinta liiska khayraadka** gudaha iyo banaanka iyo talooyinka halka caruurta iyo qoysasku ay ka heli karaan khayraadka qorshaynta iyo diyaarinta qoyska, kaalmada sharciga, adeegyada caafimaadka maskaxda, turjubaada iyo adeegyada tarjumida, iyo hay'adaha kale ee gobolka iyo bulshada-iyada oo ku xidhan khayraadka kahor ama kaidb macamilka ICE ama ciidamada kale ee laanta socdaalka federlaka.

- Tilmaamaha la siiyay daryeelayaasha DCYF iyo OSPI
- Diyaarinta khayraadka onleynka ah ee Gudida Arrimaha Hisbaaniga iyo DCYF
- Abuurista Waraaqaha Khayraadka Kala Kaxaynta Kahor
- Abuurista Waraaqaha Khayraadka Kala Kaxaynta Kadib
- Samaynta liiska khayraadka gudaha ee shaqaalaha gobolka
- Abuurista siyaasada gaarka ah ee ka jawaabida kala kaxaynta qoysaska ee khalkhalka guryaynta, iyo taageerada bulshada ee kale





Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

www.dcyf.wa.gov

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION ADM_0038 SM (08-2025) Somali